

Daraasadda Qiimaha Suuqa & Sahalka (MPS) Maqaalka Warsidaha 2026 (Ingiriisi)

Ka-qaybgalkaagu wuxuu muhiim u yahay Daraasadda Qiimaha Suuqa iyo Saadka ee 2026!

Barayaasha Carruurta Yaryar ee qaaliga ahoow,

Waxaa farxad noo ah inaan kula wadaagno in Daraasadda Qiimaha Suuqa & Sahalka (MPSS) ay dhici doonto laga bilaabo **1-da Oktoobar ilaa 31-ka Diseembar, 2026.**

Daraasaddaan waxaa la sameeyaa labadii sanoba mar si loo fahmo qiimaha iyo saadka xannaanada carruurta ee Oregon ee haatan jira. Sanadkii 2024, waxaan helnay ka-qaybgal aad u heer sarreeya, waxaana ku faraxsanahay sii wadidda ka-qaybgalkaaga!

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad macluumaad ku saabsan barnaamijkaaga la wadaagto Find Child Care Oregon ama adigoo ka qayb qaadanaya sahan. Macluumaadkaaga adiga ayaa keligaa gelin kara ama waxaad caawimaad ka heli kartaa xafiiska CCR&R ee gobolkaaga.

Macluumaadka aad bixiso wuxuu noqonayaa raasumaal gacan ka geysta in la xaqiijiyo in qoysasku si siman u helaan xannaanada carruurta. Hoggaamiyeyaasha Oregon waxay xogtan u adeegsadaan inay ku fahmaan xannaanada carruurta ee Oregon. Xogta waxaa loo adeegsadaa in lagu saleeyo go'aannada ku saabsan siyaasadaha xannaanada carruurta. Go'aannadan waxaa ka mid ah maalgelinta nidaamka waxbarashada carruurta yaryar iyo go'aaminta heerarka qiimaha kabida.

Macluumaadka qiimaha lala ma wadaago waalidiinta, waxaana la soo warbixiyaa iyada oo aan lagu darin macluumaad lagu aqoonsan karo barnaamijka.

Waad ku mahadsan tahay waqtigaaga iyo ka-qaybgalkaaga,

Find Child Care Oregon ee Western Oregon University, Oregon State University iyo Department of Early Learning and Care

